SOMALI

Barmaamijyada lacag-la’aanta ah ee lagu taageero qofkii la kulma dhibaato Qalalaase oo gurigiisa ah.

Macluumaad ku saabsan taageerada loo sameeyo waayeelka iyo carruurta ee ku qeexan Axdiga ka-magangelinta Qalalaasaha Guriga 1995 « Domestic Violence Act 1995 »

Haddii aad u magan tahay, oo lagugu ilaalinayo Axdiga ka hortagga qalalaasahaha guriga “Domestic Violence Act 1995”, waxaad ka qayb geli kartaa barmaamij bilaash ah oo lagugu taageerayo sidii aad xallili lahayd dhibaatooyinkaaga ee aad u waajihi lahayd xaalladdaada..

Barmaamij taageero oo bilaash ahi waxay kaloo u yeelaan ilmo kasta oo kula noola amase kula degan.

Barmaamijyada taageero ee Axdiga Ka-magangelinta Qalalaasaha Gurigu waxay yihiin kuwo –

- bilaash ama lacag-la’aan ah
- dhowrsoon oo aan cid kale loo sheegin
- ilaalinaya nabadgelyadaada
- ku siinaya isku kalsoonaansho.

SIDEE BAY BARMAAMIJYADANI II CAAWIN KARAAN OO II TAAGEERI KARAAN ANIGA?

Barmaamijyadani waxay kuu taageeri karaan inaad **hore u marto** oo aad ku **nabadgasho**. Waxay ku siinayaan macluumaad ku saabsan amarka magan-gelyada, iyo waxyaabaha uu keeno ka magangelinta qalalaasaha gurigu.

Barmaamijyada carruurtu waxay ka caawin karaan ilmaha inay fahmaan oo waajahaan qalaasaha iyo xoogga, isla markaana ogaadaan saamaynta ay iyaga iyo qoyskooda ku yeelan karaan dhibaatooyinkaasi

Waxaad kala dooran kartaa qaybo badan oo barmaamijyadaas ah. Waxaa loo bixiyaa iyadoo koox koox dadka meel loogu wada sharxo, amase iyadoo shaqsi-shaqsi loo siiyo dadka talada barmaamijyadaas. Barmaamijyada qaarkood waxay ku siin karaan xannaano carruurta intaad casharka ku maqantahay iyo in lagu keeno goobta casharradu ka socdaan oo lagaa soo celiyo.

Barmaamijyadani aad bay uga duwan yihiin kuwa lagu amro **ka jawaabaha** (qofka gaystay denbiga qalalaasaha ama xoogga ee amarku ku dhacay) in uu raaco, si uu u barto inuu bulshada dhexdeeda ugu noolaado si toosan oo bilaa rabsho ah.

YAA BIXIYA BARMAAMIJYADA?

Dhammaan talooyinka iyo casharada waxaa bixiya **xirfadleyaal u tabobaran**, oo laga soo ansixiyey Wasaaradda Caddaaladda

Waa shaqsiyaad aad ugu dareen badan xaalado kala duwan ee ku saabsan da’da, jinsiyadda (lab/dhedig), dhaqanka, doorashada jinsiyadda amase naafonimada.

BARMAAMIJYADA KU SAABSAN TAAGEERADA WAAYEELKA

Barmaamijyadani waxay –

- kuu sheegi doonaan sida uu u shaqeeyo amarka ilaalinta, iyo waxa aad xaq u leedahay amarkaas awgiis
- ku siindoonaa macluumaad ku saabsan ka magangelinta qalalaasaha guriga iyo saamayntiisa

- kaa caawin doonaan sidii aad ugu raadsan lahayd kaalmo naftaada, ugana heli lahayd kaalmadaas saaxibadaa, ehelkaaga iyo bulshada dhexdeeda
- kaa caawin doonaan inaad qorshaystato naftaada, kuna nabadgashaan adiga iyo carruurtaadu
- kaa caawin doonaan inaad samaysato horumar wacan oo noloshaada ah.

BARMAAMIJYADA KU SAABSAN TAAGEERADA CARRUURTA

Dhammaan dhibaatada qalalaasaha waxay saameeyaan carruurta, xataa markay carruurta arkaan ama maqlaan rabsho, xoog amase qalalaase kale.

Carruurtu waxay u baahan yahay **taageero dheeri ah iyo caawimo** si ay uga soo kabtaan dhibaatada ku timi noloshooda. Barmaamijyo taageero oo bilaash ah ayaa jira oo carruurtaadu heli karto, ilaa 17 jir, iyagoo koox kale la qaadanaya ama kali-kali loo siinayo talada.

Barmaamijyadani waxay ka kaalmeeyaan carruurta inay –

- bartaan sidii ay u nabadgeli lahaayeen ee naftooda u magangelin lahaayeen
- fahmaan sida qalaasuhu shaqsiyaddooda u saamayso
- inay xallilaan dhibaatooyinka, oo dareenkooda iyo qiiradooda ama niyad-kacooda maamulaan
- kobciyaan isku kalsoonaansho.

Adiga amase ilmo-xannaaneeye kale ayaa soo raaci kara carruurtaadu markay imanayaan barmaamijka.

MUDDO INTEE LE'EG AYAY BARMAAMIJYADANI II DIYAAR YIHIIN?

Waxaad haysataa inaad ku dalbato barmaamijyadan lacag-la'aanta ah muddu ugu badnaan **saddex sannadood ah,** ka dib marka lagu siiyo amarka ilaalinta.

Xaalado gaar ah awgood, waa la dheerayn karaa waqtiga, sidaa darteed waydiiso Maxkamadda in amarka lagu siiyey ka badnaan karo saddex sannadood.

Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan barmaamijyadan taageero, waxaad la xidhiidha Maxkamadda Qoyska, ka eeg barta internetka ee Maxkamadda Qoyska (www.justice.govt.nz/family), ama kala hadal qareenkaaga.

FOOMKA DALABKA

Barmaamijyada dadka waawayn ee la ilaalinayo

Anoo raacaya Waaxda 29aad ee Axdiga qalalaasaha 1995 “Domestic Violence Act 1995”, waxaan codsanayaa in la ii siiyo barmaamij dulucdiisu tahay fidinta ka-magan-gelista dhibaatada qalalaasaha ee guriga.

Magac: _____

Cinwaan: _____

Telefoon: _____

Asalka (jinsiyadda): _____

Magaca qofka geystey qalalaasaha sida ku cad amarka ilaalinta:

_____

_____

Maxkamadda qoyska ee bixisey amarka ilaalinta:

_____

Barmaamijyada carruurta

Anigoo raacaya Waaxda 29(1)(b) ee Axdiga Qalalaasaha 1995 “Domestic Violence Act 1995”, waxaan codsanayaa in ilmahan / carruurtan hoos ku taxan oo ka mid ah qoyskayga la siiyo barmaamij dudlucdiisu tahay fidinta ka-magan-galista dhibaatada qalalaasaha guriga.

Magacayga: _____

Cinwaanka: _____

Teleefon: _____

Magaca Ilmaha	Taariikhda dhalashada	Asalka(jinsiyadda)
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

Maxkamadda qoyska ee bixisey amarka ilaalinta:

_____

Magaca qofka geystey qalalaasaha sida ku cad amarka ilaalinta:

_____

_____

277 DFC Domestic 009 10/9FINAL 10/9/03, 5:53 PM 1

Isku laban-laab foomkan oo u soo dir ama gee Maxkamadda Qoyska ee kuugu dhow.

[Text for back page]

Buug-yarahani wuxuu soo koobayaa qaybo ka mid ah Axdiga ka hortagga Qalalaasaha Guriga 1995 ”Domestic Violence Act 1995.”

Haddii aad wax su’aalo ah hayso, ka eeg Axdiga ka hortagga Qalalaasaha Guriga amase u tag qareen.

Faahfaahin dheeri ah, kala xidhiidh Maxkamadda Qoyska ee degmadaada.

Buug-yarahan waxaa laga helayaa degelka internetka ee Wasaaradda Caddaaladda www.justice.govt.nz

Courts 009
[Month and year of publication]